JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA

TAYO PUBLIC NOTARY
MOGADISHU-SOMALIA

جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال

## UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **02/09/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

| | |
|---|---|
| **WAKAALAD BIXIYE:-** AHMED ABDULLAHI OSMAN, Ina Xaawo Cabdi Cusmaan, Somali ah, Ku Dhashay: Wajir, Sanadkii: 15/09/1967, Sita: Kenyan passport, Lr. BK270490 | **LA WAKIISHE:-** NUR ABDULLAHI OSMAN, Ina Xaawo Cabdi Cusmaan, Somali ah, Ku Dhashay: Cadaado, Sanadkii: 01/03/1972, Degan Garasbaalley, Sita: Somali Passport, Lr. P01335482 |
| **TILMAAMAHA DHULKA**<br>Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(H/wadaag)**, Cabirka: **(20X15-Mt)-M**, Looto No: **1238-H**, W.M.L: **(Rep.74248/MPN/2020)**, **Tr. 28/07/2020**, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble | **SOOHDINTA DHULKA**<br>Bari: **jid**, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad |

**B-** Aniga oo ah **AHMED ABDULLAHI OSMAN**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkey **NUR ABDULLAHI OSMAN** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in Dhulkaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **NUR ABDULLAHI OSMAN** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **NUR ABDULLAHI OSMAN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Walaalkey **AHMED ABDULLAHI OSMAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA**

AHMED ABDULLAHI OSMAN

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

NUR ABDULLAHI OSMAN

***SAXIIXA MARKHAATIYAASHA***

1- ABDIRAHMAN AHMED ABDI

2- MOHAMED ALI FARAH

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1789/T.P.N/25, Tr. 02/09/2025,** Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- AHMED ABDULLAHI OSMAN Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- NUR ABDULLAHI OSMAN Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

**NOOTAAYAHA**

By: ABDULL **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**

+252 612-223788
+252 615-353330
info@tayonotary.com
www.tayonotary.com
Bakara Market, Near Maalin Tajir Building, Mogadishu - Somalia

# AQOONSIGA,SAXIIXA IYO SAWIRKA WAKAALAD BIXIYAHA









# AQOONSIGA,SAXIIXA IYO SAWIRKA LA WAKIISHAHA







# AQOONSIGA IYO SAXIIXA MARQAATIYAASHA












MUQDISHO PUBLIC NOTARY
[illegible] AUG 2020
DIIWAANGELINTA NO 064907

**UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNICIPALLE AH.**

**Muqdisho:** Maanta oo ay taariikhdu tahay 28/07/2020, anigoo ah Dr. Saciid Cali Cosoble, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

| | |
|---|---|
| **ISKA IIBIYE:** CABDI QALAAD WAGAD AFDHUUB, Hooyo: Xabiibo Cali Warsame, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1975, degan Muqdisho, Leh: W.A.L., Lr. 000108939 Kana soo Baxday Jamhuuriyadda Soomaaliya. | **IIBSADE:** AXMED C/LLAAHI CUSMAAN, Hooyo: Xaawo Cabdi Cusmaan, Somali ah, Ku Dhashay: Cadaado, Sanadkii: 1967, degan Kenya. |
| | **WAKIILKA IIBSADAHA:** NUUR C/LLAAHI CUSMAAN |
| **WARBIXINTA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO** Kuna yaal: Muqdisho, Degmada: H/wadaag, Cabirka: (20X15)-M, Looto No: 1238-H, W.M.L: 2401/2017, Tr. 20/08/2017, Kana Soo Baxay Nootaayo Tiikey, Dr. C/risaaq Maxamed C/lle"Tiikey". | **SOOHDINTA DHULKA** Bari: Jid, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Dhul dad. **QIIMAHA DHULKA:** USD $31,000 (Soddon iyo Kow Kun oo Doolarka Mareykanka ah). |
| **ASALKII HORE EE DHULKA** Magaca: Nuur Maxamed Kulmiye, Cabirka: (40X30)-M, Looto No: 1237-1240-H, Rasiid No. 35098, Tr. 11/01/2005, Sabarlog: 50/48/2005, Tr. 16/01/2005, Kana Soo Wada Baxay Dawladda Hoose ee Muqdisho. | |

Hadaba qoraalka sare iyo kan soo socda oo wada xariira ayaa dhinacyada heshiiska waxay caddeynayaan sidatan:

**ISKA IIBIYE:** Aniga oo ah Cabdi qalaad wagad Afdhuub, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba safiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey Axmed C/llaahi Cusmaan dhulkayga banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yihiin, waxaan kale oo aan cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla dhulkaan, waxaan kaloo caddaynayaa in aan qaatay dhammaan lacagta sare ku xusan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana dhulkaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuuraheedba wuxuu u wareegay iibsade Axmed C/llaahi Cusmaan.

**WAKIILKA IIBSADAHA:** Aniga oo ah Nuur C/llaahi Cusmaan, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in Cabdi qalaad wagad Afdhuub si buuxda iigu wareejiyay dhulkaan lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan u gudoomay iibsadaha dhulkaan, una saxiixay kaalintiisa heshiiskaan.

**MARKHAATIYAASHA:** Anaga oo kala ah 1-C/qaadir Cali Yuusuf "Gaatiye", 2-C/llaahi Aadan Colaad, 3-C/llaahi Xasan Xirsi, waxaan qoraalkaan ku cadaynaynaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay beeca dhulka sare ku xusan.

**SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA**

CABDI QALAAD WAGAD AFDHUUB

**SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA**

NUUR C/LLAAHI CUSMAAN

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- C/QAADIR CALI YUUSUF "GAATIYE"

2- C/LLAAHI AADAN COLAAD

3- [illegible] XIRSI

**Rep. 74248/MPN/2020**

**(CADDEYNTA NOOTAAYAHA)**

**Tr. 28/07/2020**

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, **Dr. Saciid Cali Cosoble**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1-) Cabdi qalaad wagad Afdhuub (ahna iibiyaha dhulka), 2-) Nuur C/llaahi Cusmaan (ahna wakiilka iibsadaha dhulka), iyo waliba saddexda nin ee soomaaliyeed oo dhanka maragga ka ceelwiyey oo kor ku xusan, dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskaan iigula saxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, caafimaad qaba, xiskooduna taam yahay, cid khasbeysana aysan jirin, waana beec ansax ah oo waafaqsan Shareecada Islaamka.

**NOOTAAYAHA**
**DR. SACIID CALI COSOBLE**

By: Mahad

## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

**Tr. 29/09/2025**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Nuur C/llaahi Cusman** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1789/T.P.N/25, Tr. 02/09/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

| | |
|---|---|
| **Magaca La Wakiishaha** | Nuur C/llaahi Cusman |
| **La Wakiishay** | Dhul |
| **Cabirka** | 20X15-M |
| **Ku Yaallo** | Muqdisho, Degmada H/wadaag |
| **Lotto Lambar** | 1238-H |
| **W.M.L** | Rep.74248/MPN/2020, Tr. 28/07/2020<br>Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho |
| **Taariikhda Wakaalada** | 02/09/2025 |

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **Nuur C/llaahi Cusman**, Leh Tel No. **0615866792**, Degan **Garasbaaleey** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

_________________________

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Nuur C/llaahi Cusman**

_________________________